



# MACLUUMAADKA KUSAABSAN GAADIIDKA

## UDIYAAR GAROOWGA SANAD DUGSIYEEDKA 2019-20



Ayadoo sanad dugsiyeedka 2018-19 uu siidhamaanaayo, Adeegyada Gaadiidka ee Denver Public Schools (DPS) waxay doonaysaa inay kaaga mahadceliso shaqadaadii wacnayd ee sanadkaan. Adeegga Gaadiidka ee DPS wuxuu fure uyahay guulaha waxbarashada, kaasoo fursad siman usiinaaya dhamaan ardayda xaqa uleh adeegga buuxinaayana baahiyaha waalidiinta. Fadlan dib u eegis kusamee macluumaadka aan waraaqdaan kubixinay, taasoo sharaxaysa talaabooyinka aad ugu diyaar garoobayso sanad dugsiyeedka soosocda.

### Qaybaha Shaqada Sanad Dugsiyeedka Cusub

Talaabooyin caawimaad buuxda siinaaya qoyskaaga si ay ugu diyaar garoobaan maalinta koobaad ee sanad dugsiyeedka

#### ✔ Xaqiiji in macluumaadka lagaa lasoo xariiraayo aad cusboonaysiiso

Waa muhiim inaad lahaato ciwaanka aad dagan tahay oo sax ah arday kasta oo kuudhigta dugsiiga maadaama adeegyada gaadiidka loo fidinaayo ardayda xaqa uleh si loogasoo qaado gurigooda hadhoowna loogu cesho. Isbadalada kudhaca guriga aad dagantahay waxaad usheegaysaa kaliya dugsiiga cunugaagu dhigto.

#### ✔ Kafiiri barta Waalidka/Webseetka Gaadiidka wixii laxariira macluumaadka baska

Ardayda raacaaya Basaska Success Express, marinka baska ee ardayda xaqa uleh inay raacaan waxaa laga heli karaabogga gaadiidka ee Barta Waalidka laga bilaabo daba yaaqanada Luuliyo/Agoosto. Ardayda raacaaya Basaska Success Express, jadwalada ayaa laga heli karaa daba yaaqada Luuliyo/Agoosto barta transportation.dpsk12.org. Waxaan kugula talinaynaa inaad macluumaadka baska hubiso dhawr jeer kahor intaan lagaarin maalinta koobaad ee dugsiiga, maadaama macluumaadka isbadali karo.

#### ✔ Buuxi foomka Codsiga Oonleenka ah ee aalada Gaarka ah hadii loo baahdo

Hadaadan kahelin wax macluumaad bas ah Barta Waalidka, ardaygaaguna uusan uqalmin adeegyada Basaska Success Express, cunugaaga ayaa laga yaabaa inuusan uqalmin adeegga gaadiidka. Waxaad buuxin kartaa foomka Codsiga Gaarka ah ee Gaadiidka oo Oonlen ah adoo kacodsanaaya gudaha barta. Codsiyada xaaladaha gaarka ah ee gaadiidka sanadka dugsiyeedka 2019-20 ayaa lasoo gudbin karaa laga bilaabo Isniinta, Luuliyo 15 keda ilaa maalinta Jamcada, Luuliyo 26 keeda. Go'aanada waxaa lagu dhawaaqayaa Jamcada, Agoosto 16. Dhamaan go'aanada laga gaaro Codsiyada Gaarka ah ee ogolaanshaha gaadiidka waxaa laguugusoo dirayaa emailka ayadoo lagu dirayaa emailka codsiga lagasoo diray.

#### ✔ Qaado kaarka CUSUB ama mid Cusboonaysiin ah ee +Pass

+Pass ka cusub ama lacusbonaysiinaayo waa in laga codsadaa xoghayaha jga xafiiska hore ee dugsiiga ardaygu dhigto. Xoghayaha ayaa intaas kadib kusiinaaya +Pass kumeelgaar ah si ardayga waqtigaas u isticmaalo, inta +Pass rasmi ah loogu samaynaayo. Qoysasku waxay soo qaadan karaan kaarka +Pass ayaa imaanaaya Dhismaha Maamulka Adeegyada Gaadiidka bilowga bisha Agoosto. Saacadaha: 8 a.m.-12 p.m.; 1-4 p.m. | Goobta: 2909 W 7th Ave., Denver 80204. **Fadlan ogoow: Kaararka +Pass ee labixiyay sanad dugsiyeedkii 2018-19 ayaa siishaqaynaaya sanad dugsiyeedka 2019-20**

#### ✔ Nalaso xariir

Transportation.dpsk12.org ayaad kahelaysaa macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan dhamaan goobahaas oo dhan waana meesha ugu fiican ee aad marka koobaadba macluumaadka kafiirsanayso. Hadaad wali qabto su'aalo, agalaso xariir emailkeena oo ah transportation@dpsk12.org ama wac kooxda deegyada marinada gaadiidka oo nambarkoodu yahay 720-423-4699 inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada Isniinta ilaa Jamcada.



## Bus Bulletin

XASUUSINO LAXARIIRA SANAD  
DUGSIYEDKA 2019-20

Hadaad leedahay arday raaca baska dugsiga, Adeegga Gaadiidka ee DPS ayaa siinaaya tilmaamaha Baska taasoo ushaysa degmada inay kuusoo sheegto macluumaadka rasmiga ah iyo wararka cusub ee laxariira adeegga baska ee ardaygaaga. Qoysaska waa loosheegayaa marka basasku ay dib dhacaan wax kabadan 10 daqiiqo sababo laxariira xaalad degdeg ah, mid farsamo ama dib dhac dhanka cimilada kadhaha ayadoo loogu diraayo fariin qoraal ahaan, email iyo/ ama fariin codeed.

Xubnaha qoyska ee ardayda xaqa uleh adeegga gaadiidka waxay si ootomaatig ah ugu qoranyihiin inay helaan fariimaha codka ah iyo kuwa emailka ah labadaba ayna oo kawaramaaya macluumaad Baska, ayadoo hadba kuxiran nambarka taleefanka iyo emailka dugsiga lasiiyay markii ardayga laqoraayay. Qoysaska waxaa lagula talinayaa inay booqdaan Bogga Waalidka si ay uxaqiiyaan/ucusboonaysiiyaan Macluumaadka Tilmaamaha Baska si macluumaad lagal soo xariiraayo kan saxda ah ee ay hada haystaan.



### WEBSSETKA ADEEGGA GAADIIDKA:

*Adeegyada Gaadiidku waxay si firfircoon uga shaqaynayeen dhamaan sanad dugsiiyeddka 2018-19 si loo casriyeeyo transportation. [dpsk12.org](http://dpsk12.org) si waalidiinta iyo ardaydu uga helaan macluumaadka gaadiidka ee muhiimka ah. Qoysaska ayaa fikir kadhiiban kara adeegyadeena, sidoo kalana diri kara Codsiga Hubinta Alaabaha Lumay. Waxaan kudhiiri galinaynaa dhamaan dhinacyadu inay booqdaan bogga gaadiidka si ay uhelaan macluumaadka dhamaan adeegyada aan bixino ayna lasocdaan wixii isbadalo ah ee yimaada.*



## Gadiidka Waxbarashada Gaarka ah

Macluumaad muhiim ah oo kaacaawinaaya udiyaar garoowga maalinta koobaad ee dugsiga

Ardayda loo aqoonsaday inay ubaahan yihiin adeegyada waxbarashada gaar ah, meelaynta Barnaamijka Waxbarashada Gaar ah (IEP) ayaa la go'aaminayaa hadii cunugaagu ubaahan yahay in gaadiid lagusoo qaado. Adeegyada Gaadiidku waa inay helaan macluumaad sax ah oo dhamaystiran oo laxariira baahiyaha gaarka ah ee cunugaaga kaasoo uu soo gudbiyo Xafiiska Sinaanta iyo Fursdaha ee Ardayga si loo xaqiijiyo gaadiid badqab leh. Foomka Macluumaadka Gaadiidka ayaa loo baahan yahay kahor intaan adeegyada gaadiidku bilaabmin. Si waafaqsan Sharciiga Xaquuqda Waxbarashada iyo Arimaha Shaqsiga ah ee Qoyska (FERPA) dhamaan macluumaadka shaqsiga ah ee laxariira ardayga waa mid gabi ahaanba qarsoodi ah.

### Macluumaad kusaabsan Hanaanka

Qoysaska leh ardayda qaba baahiyaha gaarka ah, kuwaasoo IEP doodu leedahay adeegga gadiidka, waa inay bilaabaan hanaanka ayagoo laxariiraaya macalinka baahiyaha gaarka ah ee cunugooda. Foomka oonleena ah ee 1066 waa inuu buuxshaa macalinka ardaygu, ama wakiil kasocda dugsiga, loona diraa Xafiiska Sinaanta iyo Fursdaha Arday ee DPS (SE&O). Marka foomka lahel, iskaashadaha taageerada siiya SE&O ayaa iskuduwaaya gaadiidka asagoo laxariiraaya adeegyada gaadiidka ee DPS si toos ah.

### Waqtiga Udagsan Hanaanka Kashaqaynta Codsiyada Gaadiidka

Marka iskaashadaha dhanka taageerada ee katirsan SE&O uu ugudbiyo codsiga Adeegyada Gaadiidka, waxay qaadan kartaa ilaa 10 maalmood oo kuwa shaqada ah in laga shaqeeyo codsiga. Muddadaan ayaa qaadan karta intaas in kabadan hadii macluumaadka ciwaanka iyo xariirka qoysku aysan sax ahayn. Si ay gacan uga gaystaan yaraynta dib udhaca kuyimaada diyaarinta gaadiidka biloowga sanad dugsiiyeddka, qoysaska dhalay ardayda baahiyaha gaarka ah qaba waxaa loosoo diri doonaa ogaysiisyo xsuusin ah inta lagu jiro bilaha xagaaga, si loo xaqiijiyo in macluumaadkoodu sax yahay.

### Cida Aad Laxariirayso markaad Su'aalo qabto

Dhamaan su'aalaha laxariira hanaanka rakibida iyo ilaalinta gaadiidka rdayda waxbarashada gaarka ah qaba ay raacaan waa inay soo maraan macalinkaaga waxbarashada gaarka ah kaasoo usii gudbiyaaya iskaashadaha taageerada ee katirsan SE&O. Qoysasku waa inay kaliya laxariiraan Adeegyada Gaadiidka si toos ah si ay ugudbiyaan fikir ay kaqabaan darawal ([transportation@dpsk12.org](mailto:transportation@dpsk12.org)), ama ay usoo wargaliyaan maqnaanshaha ardayga.

#### Soo sheegista Arday Maqan:

- Baska Jaalaha ah ee Ardaydu Raacdo: 720-423-4624 Raadiyaha Gadiidka DPS
- Ardayda Raacaaya Gaadiidka Shirkada American Logistics 855-292-4364, dookha 1

Macluumaad dheeri ah oo laxariira hanaankaan waxaad kahelaysaa [transportation.dpsk12.org/eligibility-and-routing/special-education-services/](http://transportation.dpsk12.org/eligibility-and-routing/special-education-services/).